



## **Guddoomiyaha Waxbarashadu wuxuu dib-u-habeynayaa shaqaalaha si ay xoogga u saaraan waxbarashada**

Waxa laga maarmaan noqotay in xoogga la saaro duruusta waxbarashada iyo isbedel la xiriira haykalka dhismaha Dugsiyada Dadweynaha Portland, kaasi oo lagu tilmaamay shirkii shaqaalaha uu la yeeshay Guddoomiyaha Waxbarashada ee Guadalupe Guerrero.

“Waa waqtigii ugu haboonaa in isbedel koritaan nolosha caruurta lagu sameeyo,” waxaa sidaa yiri Guerrero oo la hadlayey in ka badan 100 shaqaalaha degmada qolka xarunta maamulka waxbarashada.

Guerrero wuxuu xusay in ay u soo dhammaatay 30kii maalmood ee ugu horeeyey intii uu xilkan hayey, iyada oo ay ka go’an tahay in dugsiyada degmadu ay u baahan yihiin agab iyo in fiiro badan la siiyo waxa ka socda fasalka gudihiisa.

“Waxa muhiim ah in aan abuurno rajooyin ay saldhig u yihiinn manhaj tay’adiisu leedahay heerar kala gadisan iyo habka wax loogu dhigayaa ee uu yeelanayo,” ayuu yidhi, “iyada oo ay noo cadahay waxa ay tahay inay ardaydu aqoonta u leeyihiin iyo wixii ay qaban karayaan ee ahayd inay qabtaan.”

Waxa uu yiri, waxa aan abuuri doonaa boos cusub oo ah Ku-Xigeenka Guddoomiyaha Waxbarashada oo dhinaca Waxbarida iyo Bulshooyinka Iskuulka hawshooda qaabilsan. Booskaas waxa ka hoos shaqeyn doono saddex xubnood madaxa ah: Madaxa Tacliinta, Madaxa Addeegyada Gargaarka, iyo Madaxa Iskuulada.

Guerrero wuxuu yiri, in isagu qaadan doono xilkii Madaxa Tacliinta sida ugu degdeg badan ilaa inta loo helayo qof si joogta xilkaasi u qabta. Boosaskan shaqo waa la soo bandhigi doonaa iyada oo sida ugu dhakhso badan ee suurtagal ah loo shaqaaleysiin doono.

“Waxaan jecelahay in aanu seeska u dhisno, sidaas awgeed si weyn bay wax inoogu kala cadaan doonaa inaga oo isku xirnaan doona dhammaan waaxyaha degmada oo dhan,” ayuu yiri.